The Royal Women's Hospital Information for Women

4. Depo Provera - Tallaalka uurka laga hortago

Abriil 2004

4. DEPO PROVERA - A CONTRACEPTIVE INJECTION

Maxaad u isticmaaleysaa uur ka hortagaha?

Uur ka hortagu waa lagama maarmaan haddii aad dooneyso inaad iska ilaaliso uur aadan dooneynin iyo infekshinka galmada laysku qaadsiiyo.

Bil kasta ugxan sidaha dumarku wuxuu soo saaraa ukun. Marka ninku biyo baxo, shahwadiisu waxay ka kooban tahay malaayiin shahwo ah. Waxayna ku qaadaneysaa mid keliya inay bacrimiso ukuntan oo uur ku bilaabmo. Haddii lammaane isu galmoodo (guska oo siilka ku jira) oo aadan wax ka hor tag ah aadan sameyn, khatarta inaad uur qaado aad ayey u sareysaa. Isticmaalida uur ka hortagahu waxay kuu ogolaaneysaa inaad galmooto iskana ilaaliso uurka aan loo qasdin.

Kondhomka ayaa had iyo jeer ah fikrad wanaagsan

Ustareeliya gudaheeda, waxaa jira in ka badan 20,000 oo ah infekshano cusub oo galmada laysugu gudbiyo sannad kasta. Mid ka mid ah kuwa ugu caansan kuwan waa chlamydia, oo keeni kara ma dhaleysnimo haddii aan la daaweyn. Kondhomka ayaa ah wax ugu wanaagsan ee kaa ilaalin kara infekshinka. Haddii aad isticmaasho kondhom iyo saliid biyo ku saleysan wakhti kasta oo aad galmooneyso fursada uu kuugu dhici karo HIV/AIDS wuu yaraanayaa iyo infekshino badan oo kale oo galmada laysugu gudbiyo (STIs).

Depo Provera

Depo Provera waa hormoon loo isticmaalo uur ka hortegida. Waxaa loo qaataa cirbad ahaan saameyntiisuna waxay jireysaa ilaa saddex bilood. Waxay la mid tahay progesterone, oo ah mid ka mid ah labada hormoon ee ugu weyn ee uu sameeyo ugxansidaha naagtu inta xilligeeda caadiga ah lagu jiro.

Siday u shaqeyso
Markay qofka dumarka ahi qaadato Depo Provera, jirkeedu wuxuu dareemaa joogitaanka hormoonka saa daraadeed hormoonkeedii waa "la demiyaa". Sababtan awgeed, ugxansidaheedu ma soo deyn doono ukun waana sida uurka looga hortago. Tani waxay aad ula mid tahay sida "kiniinigu" u shaqeeyo. Depo Provera waxaa sidoo kale loo isticmaalaa daaweynta cudurka dumarka ee (endometriosis).

Sida wanaagsan ee uu u shaqeeyo
Depo Provera aad bay u tahay hab uurka lagaga hortago oo waxtar leh, wayna ka waxtar badan tahay kiniiniga laysku daray. Haddii 100 naagood isticmaalaan Depo Provera muddo 1 sanno ah, hal naag ah oo ka mid ah dumarkaas ayaa uureysaneysa, taas micnaheedu waxaa weeye 99 ma uureysan doonaan. Ma jiro hal hab oo uur ka lagaga hortago oo waxtarkiisu dhameystiran yahay. Depo Provera waxtarkeedu wuu sii soconayaa haddii saddexdii biloodba la duro markay wakhtigeedii tahay.

Waxyeelada
Caaddada
Sababtoo ah heerka hormoonka oo hooseeya, dumarka badidoodu waxaa ku dhaca xariiq ku sameysanta ilmo galeenka iyo caadada oo ka yaraata. Laba ilaa saddex cirbadood ka dib, dumar badani wax caada ah mehi doonaan gebi ahaan sababtoo ah ma jiro wax soo daynaya caadada. Dumarka qaarkii waxay helayaan dhiig aan micno lahayn, oo badanaa ah mid fudud oo aan caadi ahayn. Wakhtiyada qaarkood qofka dumarka waxaa ku dhacaya dhiig bax badan oo dhib badan, oo badanaa lagu xaddidi karo ku daaweynta hormoon.

Waxyeelada kale
- Waxaa sidoo kale mar marka qaarkood dhacda in culeyskaagu wax yar kordho inkastoo dumarka badidoodu ayna yeelan wax isbedel ah qaarkoodna culeykaaba ka dhaca
- Dumarka qaarkii waxaa laga yaabaa in madax xannuunku dhibo, uurku jirta iyo niyadooda oo isbedesha
- Dumarka qaarkood xiisaha galmada ayaa ka yaraada, gaar ahaan dumarka qaba niyad jabka
- Tiro yar oo dumar ah ayaa arka waxyeelooyin kale, oo laga yaabo wareer iyo qas laakiin aan khatar ahayn. Tan waxaa ka mid ah xasaasiyada oo ku kacda, ceshadka dareeraha iyo naasaha oo xannuuna.

Faa'iidooyinka iyo faa'iido la'aanta Depo Provera?

Faa'iidooyinka
- Depo Provera aad ayey wax tar u leedahay inayna shaqeyn la'aanteeduna aad bay u yar tahay .
- Dumar badan caada la'aantu waa u faa'iido iyadoo ka nasaneysa astaamaha sida dareenka caadada ka horeeya iyo xannuunka caadada.
- Depo Provera waxaa sidoo kale laga yaabaa inay yareyso qaar ka mid ah khatarta kansarka ku dhaca ugxan sidaha, kansarka ilmo galeenka endometrial (uterine), endometriosis iyo infekshinka lafaha miskaha.
- Waa la duraa 12 toddobaadba wax kalena oo in la qabto ama in la xasuusto sameyntooda oo loo baahan yahay ma jirto.

Faa'iido darooyinka
- Dumarka qaarkii ma rabaan inay arkaan dhakhtarkooda saddexdii biloodba mar si ay cirbad u qaataan.
- Dumarka qaarkii waxaa ku dhacda waxyeelo sida horeba loo sharxay, oo laga yaabo mid aan wanaagsaneyn ama fiicneyn.
- Mar haddii cirbada la siiyo , hormoonka lama saari karo. Haddii ay qofka dumarka ahi rabto inay joojiso Depo Provera waa inay sugtaa si ay u dhammaato . dumarka qaarkii, caadadu si tartiib ah ayey ku soo noqotaa ka dib marka la joojiyo cirbada qaadashadeeda; mar marka qaarkood waxay qaadataa ilaa 6 ama 12 bilood. Si kastaba ha ahaatee, in ka badan kala bar ayaa uureysanaya 12 bilood gudahood in ka badan 90 boqolkiiba laba sanno gudahood.

Waxyaalaha kale ee ah inaad ka fekereyto
Heerarka Hormoonku aad bay u hoseeyaan markaad isticmaaleyso Depo Provera, markaa waxaa jira dareen ah in tani keento in lafa qaar dhuubtaan (osteoporosis) dumarka isticmaala Depo Provera wakhti dheer. Muhimada tan weli lama oga, laakiinse isbedelada ayaa la rajeynayaa inay u dhacaan si tartiib ah marka loo eego kuwa dhaca marka caadadu kaa dhammaato iyo oo isbedesha marka cirbadaha la joojiyo.

Dumarku waxay caam ahaan ka welwelaan daawooyinka nooc kasta oo ay doonaan iyo kansarka. Inkastoo ay aad u adag tahay in la xaqiijiyo khatar li' dhameystiran, Depo Provera laguma arag inay wax saameyn ah ku leedahay kansarka naasaha ku dhaca. Waa in la ogaadaa

in waxyeelo laysaga ilaalin karo kansarka ugxansidaha iyo xariiqda ilmo galeenku waa wax suurto gal ah. wax waxyeelo ilmaha sameysmaya ahna lama arag inay dhaceyso haddii Depo Provera la siiyo markay qofka dumarka ahi uurka leedahay ama mar mar dhif ah oo ay naagtu uur qaado iyadoo cirbada ka hortaga uurka qaadatey.

Yaa isticmaali kara Depo Provera?

Depo Provera waxaa isticmaali kara dumarka badidooda oo aan lahayn wax dhibaato caafimaad oo khatar ah iyo dumar badan oo isticmaala noocyo kale oo uur qaadida lagaga hortago. Waxaa sidoo kale laga yaabaa inay ku haboon tahay dumarka aan qaadan Karin kiniiniga isku jira sababo caafimaad awgood.

Yaan isticmaaleynin Depo Provera?

Depo Provera kuma haboona dumarka qaba waxyaalahan soo socda:
- Dhiigbax ama qaadanaya daawada ka hortagta xinjirowga dhiiga
- Dhiigitaan aan caadi ahayn oo la ogaan
- Hiddo noocyo ka mid ah kansarkar
- Dhibaatooyin caafimaad oo khatar ah oo kale.
- Haddii aad uur leedahay
- Haddii aad dooneyso inaad uur qaado 12 bilood gudahood.

Xaggee ka helaysaa macluumaad dheeraad ah

Xarunta Macluumaadka Caafimaadka Dumarka (RWH)
(03) 8345 3045
1800 442 007 (wecitaan bilaash ah) email: whic@thewomens.org.au
http://www.thewomens.org.au

Waraaqaha kale ee xaqiiqda ee RWH lagana yaabo inay faa'iido kuu leeyihiin

RWH wuxuu leeyahay waraaqo xaqiiqeed badan oo ku qoran afaf badan kuna jira internetka.
http://www.thewomens.org.au

Waxaad sidoo kale weydiin kartaa xannaaneeyahaaga RWH inuu ku siiyo nuqul/koobi daabacan ee waraaqaha xaqiiqda ee kale ee waxyaalaha ka hortaga uurka. weydiiso:
No. 1 uur ka hortagu waa Doorashadaada
No. 2 *Kondhomyada & Diaphragms*
No. 4 *Depo Provera – tallaalka uurka ka hortaga*
No. 5 *Implanon – uurka hortaga jirkaaga la gelinayo*
No. 6 *IUD(qalabka ilmo galeenka lageliyo) (Intra Uterine Device)*